



Tallaabo Lama filaan ah, Balse Lagu Diirsado, oo Hore loo qaaday

***Sida Dedaalka iyo Wadashaqaynta Wax-ku-oolka ahi U soo afjari
karto Ciqaabtii uu ku badbaadi jiray Kufsigu***

17 December 2019

14-kii December 2019, Maxkamadda Gobolka Berbera, ee Gobolka Saaxil, Somaliland ayaa dhaqan-gelisay caddaaladdii kadib markii ay ku xukuntay wiil dhallinyar ah 12 sanno oo xadhig ah kufsi uu u geystay gabadh yar oo 5 jir ah. Tallaabada maxkamaddu ay qaadday intaa kuma ay eekaan. Wawa ay laashay heshiis xeer-dhaqameed ku sallaysnaa oo ay wada gaadheen odeyaashu. Wawa ay xidhay xabsigana u taxaabtay Aabbihii dhalay gabadha yar iyo raggii kale ee ay qaraabada ahaayeen ee aqbalay magdhawga si loo sii daayo eedaysanaha, waxayna ka diiday in la sii daayo illaa ay celiyaan magdhawgii ay aqbaleen.

Natijada ka soo baxday kiiskani waxa ay marag u tahay guusha la gaadhi karo marka ay wada shaqeeyaan dhammaan hay'adaha ku lugta leh caddaaladdu – iyaga oo si degdeg ah u hawl-galaya, iskaashanaya isla markaana leh hadaf kaliya oo mideeya kaas oo ah: dhawrista dadka tabaalaysan iyo ixtiraamka sharciga iyo kala danbaynta.

Kufsiga ilma yar oo shan jir ah waa in uuna noqon mid la iska illaawo ama la dhayalsado. Cadhadii, naxariistii, masuulyaddii iyo xalkii ay ka wada hawlgaleen dhammaan dadkii ay khusaysay waxa lagu dhammaystiray hab qumman si kiiskaa sida ugu dhakhsaha badan loogu guuleysto dacwad ku oogistiisa.

Laga soo billaabo Wasaaradda Shaqo-gelinta Arrimaha Bulshada iyo Qoyska xafiiskeeda Berbera, kuwaas oo kiiskan soo ogeysiyyey Hay'adda Horizon Institute, Cisbitalka Guud ee Berbera oo sameeyey baadhstii loo baahnaa iyo daryeekii caafimaad iyo cid kasta oo qayb ka ahayd kiiskani dareen daacad leh ayay ka muujiyeen arrintan. Taageeradii Hay'adda Horizon u fidisay ilmahan iyo qoyskeeda, xeer-ilaalinta aan ka daalin sidii ay u xaqijin lahaayeen caddaaladda, saraakiishii booliska ee aan dheg jalaq u siin heshiiskii xeer-dhaqameedka iyo garsoorihi sooy oogay dacwadda kufsigu, waxa ay tusaale u noqdeen waxa lagu guulaysan karo marka qof kastaa sameeyo dedaal iyo hadafka ay wada xaqijin karaan marka wadajir loo shaqeeyo.

Dhiiranaan badan ayay uga baahantahay gabadh haween ah ee miskiinad ah ee ku nool baadiyaha Somaliland in ay kalsoonideeda siiso waaxda caddaaladda ee Somaliland iyo in ay ka hor timaaddo Saygeeda iyo Cuqaasheeda. Laakiin hooyada gabadhan yari sidaas ayay samaysay. Wuxuu ay kalsooni siisay nidaamka caddaaladda si uu u ciqaab muto ninka ku xad-gudbay gabadheeda iyo in ay ka hor timaaddo heshiiskii dhaqan ee dammaanadda sii deynata ah siinayey ninkan eedaysanaha ah. Tallaabandan ay qaaday, waxa ay u dhabar-adeegtay in bulshadu ku faquuqdo in ay caasi ku noqotay cuqaashii iyo waxgaradkii. Haddii aanay go'aankan adag qaadan lahayn hooyadani, kiiskani wuu ka bixi lahaa maxkamadaha, sida kuwo kale oo aan la soo koobi karayn hore uga baxeen.

Jilayaasha waaxda caddaaladda ee dhammaan gobolada Somaliland, iyo dhammaan hay'adaha ka shaqeeya joojinta tacaddiyada ka dhanka ah haweenka iyo carruurtu, waa in ay u dhug-yeeshaan hannaankii uu kiiskani maray, natijada ka soo baxday iyo casharka muhiika ah ee laga baranayo go'aankan Berbera ka dhacay.

Maadaama bulshada ku nool baadiyaha Somaliland ayna haysan cusbitaalo, saldhigyo booliis, xafiisyo xeer-ilaalineed, maxkamado iyo hay'ado ay la hadlaan, waxa ay ku khasban yihiin in ay aqbalaan heshiiska lagu dhammaystiro xeer-dhaqameedka ee danbiyada kufsiga. Wuxuu ay ogsoon yihiin in ay arrintani sii dhiiri galinayso tacadiyada ka dhanka ah hablahooda, dumarkooda iyo hablaha walaalaha ay yihiin, balse ma haystaan fursad kale oo u bannaan. Go'aanka ay Maxkamadda Berberi ku laashay heshiiskii xeerdhaqameedka, iyo xukunka ay ridday waxa ay tusinaysaa qoysaskaas iyo kuwo kaleba fursadda kale ee ay haystaan sida ay u eegtahay marka ay bahda caddaaladdu isku yimaadaan si ay u gabbood ugu noqdaan dhibaneyasha kufsiga.

Hay'adda Horizon waxa ay ka shaqaysaa sidii kor loogu qaadi lahaa xuquuqul insaanka iyo hirgelinta sharciga iyo kala danbaynta. Wuxuu ayan tallo-sharci iyo taageero bilaash ah u fidinaa dumarka la kulma tacaddiyada iyo dhibaatooyinka sharciga la xidhiidha. Si aad wax badan uga ogaatid adeegyada ayan Somaliland ka fulino, fadlan boogo mid kamid ah saddexda xafiis ee ayan ku leenahay Hargeisa - Omer Hashi Building, Kaamka Barakacayaasha ee Ayaxa una dhaw saldhigga bileyksa, Iyo Kaamka Barakacayaasha Daami una dhaw saldhigga bileyksa - ama Xafiiskayaga Burco oo ku yaala Dhismaha Sagaljet . Sidoo kale waxa aad nagala soo xidhiidhi kartaa telefoonada kala ah 523603 Hargeysa ama 711208 Burco.